

## **UGU YEERID WADAHADAL**

Waddammo badan ayaa weli looga dhaqmaa naafeynta xubnaha taranka (Female genital mutilation) ee gabdhaha iyo dumarka, kaas oo ah caado fac weyn. Waxaan maanta og nahay in naafeynta xubnaha taranku tahay fal caafimaadka dhaawac u soo jiida. Sidaas darteed ayay mas'uuliyiinta Norway iyo mas'uuliyiinta dalal kale oo badanba isugu dayayaan inay dabargooyaan falkaan islamarkaana ay caawiyaan gabdhaha iyo dumarka ay dhibaato caafimaad la soo gudboonaatay naafeyn xubin taran oo lagu sameeyay awgeed.

Rugta caafimaadka- iyo adeegga caafimaadka ee dugsiga ayaa waxay gabdhaha ka soo jeeda dalalka looga dhaqmo naafeynta xubnaha taranka u fidiyaan wadahadal ku saabsan naafeynta xubnaha taranka.

Kalkaalisada caafimaadku waxay ballan kuu qabatay taariikhda:.....  
Saacadda:.....

Xor ayaad u tahay inaad la hadasho kalkaalisada caafimaadka iyo in kale. Haddii aad dooneysid wakhti kale waxaad nagala soo xiriiri kartaa telefoonka: ....., ama imow xafiiska kalkaalisada caafimaadka si aad u qabsatid wakhti kuu habboon.

Adiga ayaa go'aan ka gaari kara inaad waalidkaa marka arrintu halkaan marayso aad la socodsiineyso iyo in kale. Kalkaalisada caafimaadka waxaa saaran waajib xog-qarin haddii aad go'aansato inaad wadahadalkaan koowaad keligaa gasho.